DEPARTMENT OF NATURAL RESOURCES

# Qorshaha Helitaanka ama fahmitaanka Luuqada

Hubinta Helitaanka ama fahmitaanka Waxgalka ah oo ay helaan dadka Luuqadood Ingiriisidu aanay Fasiixa ahayn

30/06/22

Si aad u codsato dukumeentigan oo luuqad kale ku qoran, fadlan iimayl  uu dukumeentigu ku lifaaqan yahay u dir languageservices.dnr@state.mn.us.

Para pedir este documento en otro idioma, envíe un correo electrónico y adjunte el documento a languageservices.dnr@state.mn.us.

Yog xav kom muab daim ntawv no sau ua lwm hom lwm, thov sau ntawv nrog daim ntawv tuaj rau ntawm languageservices.dnr@state.mn.us.

Si aad u codsato dukumeentigan oo ku qoran luuqad kale, fadlan email u soo dir oo ku soo lifaaq dukumiintiga languageservices.dnr@state.mn.us.

Waaxda Khayraadka Dabiicigia ah ee
Minnesota 500 Lafayette Road
St. Paul, MN 55155-4040
888-646-6367 or 651-296-6157
Minnesota Relay 7-1-1
www.mndnr.gov

*Marka la codsado, dukumeentigan waxa lagu heli doonaa nooc sidan ka duwan sida iyadoo ku daabacan far waaweyn, Qoraalka indhoolayaasha ama cod ahaan u duuban. Ku daabacan waraaq dib loo farsameeyay.*

# Tusmada


Qorshaha Helitaanka ama fahmitaanka Luuqada ........ 1

Ujeedo ........ 4

Oraahda Siyaasadda ........ 4

Maamul ........ 4

Doorarka iyo Masuuliyadaha ........ 5

DNR ........ 5

Heleyaasha Hoose ee Deeqaha Federaalka ........ 6

Wacyiga iyo Tababarka Shaqaalaha DNR ........ 6

Go'aaminta Baahiyaha Adeegyada Helitaanka ama fahmitaanka Luuqadeed: Falanqaynta Afar-Qodobleyda ah ........ 7

1. Tirada ama qaybaha dadka qaba LEP ee u qalma in loo adeego ama laga yaabo in lala kulmo ........ 7
2. Inta jeer dadka leh baahiyaha LEP ay la kulmaan DNR ........ 15
3. Nooca iyo muhiimada uu u leeyahay nolosha dadka barnaamijka, hawsha, ama adeega ay bixiso DNR........ 15
4. Agabka iyo dukumeentiyada laga heli karo DNR iyo qarashka kaalmada luuqadeed. ........ 16

Soo uruurinta xogta luuqad xulashada ........ 16

Doorashada Adeegyada Caawinta Luuqadda ........ 17

Turjumaadda Hadalka ........ 17

Turjumaada Qoran ........ 19

Ilaalinta Mawduucyada Qarsoodiga ah/ Ilaalinta Qarsoonaanta Xogta ........ 21

Fahamka ugu yar ee lagama maarmaanka u ah xogta ........ 21

Waajibka lagu hubinayo in si sax ah loo maamulo xogta ........ 21

Dabagalka/Qiimaynta ........ 22

Habka Cabashada ........ 22

Lifaaqyada ........ 23

Lifaaqa I: Qeexida Shuruudaha ........ 23

Lifaaqa II: Ogeysiiska Xuquuqda Kaalmada Luuqadda ........ 25

Qaybta luuqadda DNR iyo khadadka gudbinta luuqadaha badan......25

## Ujeedo

Ujeedada Qorshaha Helitaanka ama fahmitaanka Luuqadeed (Qorshe) waa in lagu hubiyo in Waaxda Khayraadka Dabiiciga ah ee Minnesota (DNR) si waxgal ah ula xiriirto dadka fahamkooda luuqadda Ingiriisidu xaddidan yahay (LEP), iyo in qofkasta oo reer Minnesota ahi si macquul ah u heli karo macluumaadka barnaamijka DNR iyo adeegyada.

Himilada DNR waa inay dadka reer Minneosta kala shaqeyso ilaalinta iyo maareynta khayraadka dabiiciga ah ee gobolka, inay bixiso fursado madadaalo bannaanka ah, iyo inay bixiyaan fursado khayraadka dabiiciga ah ganacsi loogu adeegsan qaab leh tayo nololeed sii waaraysa. Maclumaad dheeraad ah oo ku sabsan adeegyada iyo barnaamijyada aan qabano waxaad ka helaysaa [DNR website].

Qorshahani waa qayb muhiim ah oo lagu daboolayo baahiyaha daneeyayaasheena kala duwan ee dhanka dawladda iyo kuwa aan dawladda ahayn. Kala-duwanaanshaha, sinnaanta iyo ka qaybgelintu waa qiimeyaasha muhiimka ah ee DNR. Qorshaha Istaraatijiyadeed ee wakaaladu wuxu u aqoonsanayaa kala-duwanaanshaha horumarsan, sinnaanta iyo ka qaybgelintu inay ka mid yihiin sagaal mudnaanood oo istaraatiiji ah. Waxay "hubineysaa in xarumaha, dhulalka iyo nidaamyada hawlgelinta ee DNR noqdaan kuwo la heli karo oo soo dhawayn leh, oo shaqadeenu tahay mid sinnaan ku leh dhammaan bulshooyinka dhaqan iyo dhaqaaleed."

Qorshuhu wuxu sidoo kale kaabayaa waafiqista shuruudaha federaalka. Dhammaan wakaaladaha hela kaalmada dhaqaale ee federaalka waa inay qaadaan tallaabooyin ku filan si ay u hubiyaan in ashqaasta qaba baahiyaha LEP ay helaan taageero luuqadeedka lagama maarmaanka u aha helista adeegyada iyagoo aan la kulmin wax kharash dheeraad ah.

## Oraahda Siyaasadda

Waa siyaasadda DNR inay tallaabooyin macquul ah qaaddo si ay dadka leh baahiyaha luuqadda (LEP) si macquul ah oo waqtiyaysan marin ugu siiyaan macluumaadka, barnaamijyada iyo hawlaha DNR. Sidoo kale waa siyaasaddeena in la helo Siyaasadda Helitaanka ama fahmitaanka Luuqadeed si loogu wargeliyo in adeegyada kaalmada luuqadeed lagu heli karo bilaash..

## Maamul

**Cinwaanka VI ee Xeerka Xuquuqaha Madaniga ah ee 1964 (Cinwaan VI)** wuxu mamnuucayaa takoorka ku dhisan cunsurka, midabka, asalka qofku ka soo jeedo ee barnaamijyada iyo hawlaha hela kaalmada dhaqaale ee federaalka.

**Wareegtada Madaxwaynaha 13166, ee Horumarinta Sida Dadka Fahamkooda Luuqadda Ingiriisidu xaddidan yahay u helayaan adeegyada**, waxa la soo saaray 2000. Amarkani wuxu hay'adaha federaalka farayaa inay ka shaqeeyaan sidii hay'adaha hela kaalmada dhaqaale ee federaalku u horumarin lahaayeen in codsadayaashooda

iyo ka faa'iideystayaasha LEP ay si habboon adeegyada u helaan.

**Xeer-nidaamiyayaasha Waaxda Caddaaladda (DOJ)** ee lagu fulinayo Cinwaanka VI ee Xeerka Xuquuqaha Madaniga ah ee 1964, 42 U.S.C. 2000d, et seq. (Title VI), kaas oo cidda hesha kaalmada dhaqaale ee federaalka ku waajibinaya inay masuuliyad iska saaraan in dadka qaba baahiyaha LEP ay si habboon u heli karaan hawlaha iyo barnaamijyada ay wadaan. Eeg 28 CFR 42.104(b)(2).

**Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota**, Sharciga Minnesota Cutubka 363A, wuxu mamnuucayaa takoor ku dhisan cunsurka ama asalka qofku ka soo jeedo ee ka dhex dhaca adeegyada dadwaynaha.

# Doorarka iyo Masuuliyadaha

## DNR

Marka faham luuqadeed ay codsato xubin shacab, DNR waxay dedaal macquul ah gelin doontaa in qofka loo fuliyo codsiga uu soo dalbaday. Qaybaha soo socda waxay sharraxayaan doorka iyo masuuliyadaha DNR ee bixinta faham iyo helitaan luuqadeed.

Isu-duwaha Helitaanka ama fahmitaanka Luuqadda Iyagoo u hogaansamaysa shuruudaha federaalka, ayuu gudoomiyaha DNR asteyn doonaa
Isu-duwaha Helitaanka ama fahmitaanka Luuqadda (Isu-duwaha Helitaanka ama fahmitaanka Luuqada) si uu uga soo talobixiyo oo u xiriiriyo dedaalada DNR si loogu adeego dadka qaba LEP.
Doorka LA waa inuu:

1. Ka taageero Maamulka Sare DNR (SMT) kormeerista iyo fulinta Qorshaha Fahamka Luuqadeed.
2. Kala taliyo qaybaha iyo barnaamijyada diyaarinta iyo bixinta adeegyada iyo waxyaabaha loo adeegsado fahamka luuqadeed, iyo inuu xiriiriyo dedaalada iyo kheyraadka fahamka luuqadeed ee guud ahaan hay'adda.
3. La shaqeyo hay'adaha hela kaalmada dhaqaale ee federaal ee la soo mariyo DNR (t.a, helayaasha hoose) ee Sharciga Cinwaan VI ku dabbaqmayo, si loo hubiyo in heleyaasha hoose buuxiyaan shuruudaha LEP.
4. Kaalmo ka geysto qiimeynta fahamka luuqadeed ee barnaamijyada, qaybaha iyo gobolada.
5. Uu noqdo khabiir gaar ah oo dhanka fahamka luuqadda ah iyo inuu shaqaalaha hay'adda siiyo taageero iyo tababar farsamo.
6. Xiriiriyo qiimeynta Qorsha Fahamka Luuqadda iyo siyaasad kasta oo la socota ee labadii sannadoodba mar oo isbeddel ugu sameeyo sida la rabo.

*Kooxda Fulinta Fahamka Luuqadeed*

DNR waxay sidoo kale aasaasi doonaan koox kala fanniyo duwan oo ka socda qayb iyo gobol kasta si ay ula shaqeeyaan Shaqaalaha Fulinta Fahamka Luuqadeed uga caawiyaan aqoonsashada, mudnaansiinta iyo wax ka qabashada baahiyaha fahamka Luuqadeed ee bulshooyinka qaba leh baahiyaha LEP ee DNR u adeegto. Hawlaha kooxdu waxa ku jiri doona:

1. Inay gobolada iyo qaybaha bar xiriir ugu noqdaan adeegyada fahamka luuqadda.

2. Inay taageero ka bixiyaan gudbinta Qorshaha, sida soo saarista iyo dhaqangelinta habraacyada iyo hagayaasha hawlgalka.
3. La socoshada wax-ku-oolnimada qorshaha iyo in isbedelada mustaqbalka loo soo jeediyo Isu-duwaha LA.
4. Inay Isu-duwaha LA kala shaqeyaan siduu xirii waxtar leh ula yeelanayo bulshoyinka qaba baahiyaha LEP.

*Isku-duwaha Xuquuqaha Madaniga ah (Civil Rights Coordinator)*

Isku-duwaha Xuquuqaha Madaniga ah (Isu-duwaha CR) waxay masuul ka tahay:

1. Qabashada iyo xiriirinta dib u eegista iyo xallinta cabashooyinka dhanka luuqadda.

*Shaqaalaha Maareynta ee Sare*

Maamulka Sare ee DNR wuxu ka masuul yahay hubinta in dhammaan qaybaha Qorshaha Fahamka Luuqadda iyo qorshe hawleedyada la socda lala jaanqaadsiiyo qorshe hawleedyada waaxda, iyo in shaqaale iyo keyd dhaqaale loo helo fulintooda.

*Dhammaan Shaqaalaha DNR*

Shaqaalaha DNR waxay ka masuul yihiin fahamka doorkooda bixinta adeegyada fahamka luuqadda ee la siiyo dadweynaha.

### Heleyaasha Hoose ee Deeqaha Federaalka

Hay'adaha hela deeqaha fereraalka ee loo soo mariyo DNR waxay ku hawlgalaan xeerar federaal oo la mid ah kuwa DNR ku hawlgasho. DNR waxay masuuliyadi ka saaran tahay inay hagaan oo la shaqeeyaan helayaasha hoose si loo go'aamiyo heerkooda masuuliyadeed ee ilaalinta fahamka luuqadeed. Qorshahani ma xukumo ururada goobaha DNR u adeegsada dhacdooyinka aan ahayn kuwa DNR.

## Wacyiga iyo Tababarka Shaqaalaha DNR

Shaqaalaha DNR waxa laga filayaa inay ogaadaan waajibaadkooda ay dadka qaba LEP ku siinayaan helitaan wax ku ool ah oo ay ku helayaan adeegyada, barnaamijyada iyo hawlaha waaxda. Si tan loo kaabo, Isu-duwaha LA iyo Kooxda Fulinta Fahamka Luuqadeed waxay sameyn doonaan tababar shaqaalaha ka caawinaya fahamka baahiyaha iyo masuuliyadaha bixinta adeegyada fahamka luuqadeed. Hadba inta jeer ee lala kulmayo dadka qaba LEP ayay ku xiran tahay heerka baahida loo qabo helista tababar qoto-dheer.

Dhammaan shaqaaluhu waa inay ka warqabaan Qorshaha Fahamka Luuqadda ee DNR. Shaqaalaha DNR ee ku jira boosaska maamulka, xitaa haddii aanay xiriir la sameyn dadka qaba LEP, waa inay si buuxda uga warqabaan oo u fahmaan Qorshaha si ay u xoojiyaan muhiimadda oo u hubiyaan fulinta Qorshaha. DNR waxay Qorsha Luuqad Fahamka u qaybin doontaa qaab elegtarooni ah oo waxay bixin doonaan tababar lagu hubinayo in dhammaan shaqaaluhu ka warqabaan siyaasadaha iyo habraacyada LEP. Wacyi-gelinta iyo tababarka shaqaalaha waxa ka mid noqon doona:

- Goob waxbarasho loo dhan yahay oo dhanka khadka ah oo bixineysa waajibaadka xuquuqaha madaniga ah, oo

ay ku jiraan fahamka luuqadeed. Tababarkan
waxa ku jiri doona macluumaad ku saabsan Qorshaha Helitaanka ama fahmitaanka LuuqadaDNR, sida siyaasadaha iyo habraacyada adeegyada fahamka luuqadda iyo shaqaalaha DNR ee lagala xiriirayo macluumaadka la xiriira fahamka luuqadda.

- Tababar ku saabsan sida loo isticmaalo khadadka luuqadda (turjumaadda taleefanka) ee shaqaalaha laga yaabo inay badanaa la kulmaan dad ku hadla luuqad aan Ingiriisi ahayn.

Tababar khaas ah oo dheeraad ah ayaa la siin doonaa kuwa badanaa la kulma dadka baahiyaa luuqadeed qaba (LEP). Tan waxa ka mid noqon kara sida barnaamijyada loo naqshadeeyo iyadoo LEP maskaxda lagu hayo, macluumaad ku saabsan sida qaabka ugu fiican loogula shaqeeyo tujumaanada, iyo habka habboon ee macluumaadka baahiyaha luuqadda ee qofka loo qoro.

## Go'aaminta Baahiyaha Adeegyada Helitaanka ama fahmitaanka Luuqadeed: Falanqaynta Afar-Qodobleyda ah

Helaha kaalmada dhaqaale federaalka ahaan, DNR waxa waajib ku ah inay dadka qaba LEP marin habboon u siiyaan barnaamijyada, macluumaadka iyo adeegyada hay'adda. Marka la eego hawlaha iyo adeegyada kala duwan ee qaybaha iyo xafiisyada DNR, inta jeer iyo noocyada kulan ee lagula kulmayo dadka qaba LEP way kala duwan tahay. Qayb DNR oo kasta, iyadoo hagitaan ka helaysa Kooxda Fulinta Fahamka Luuqadeed, waxay bixin doonaan jiheyn, taageero iyo xiriiro loogu talagalay xiriir la sameysashada bulshooyinka LEP si loo hubiyo inay faham waxgal ah ka helaan barnaamijyada iyo hawlaha.

Nidaamka DNR ku bixinayso fahamkan waa inuu isu dheelitiraa afarta qodob ee hoos lagaga hadlay. Su'aalaha la isku waydiiyay falanqaynta afarta-qodobleyda ah iyo macluumaadka halkan waxay hagi karaan go'aamada khaaska ah ee lagu bixinayo adeegyada iyo agabka fahamka luuqadda ee heer barnaamij, gobol iyo qaybeed. Tusaale ahaan, falanqaynta Afar-Qodobleyda ah sida luuqadaha hadalku ugu kala duwan yihiin gobolka, iyo in macluumaadka barnaamijka qaarkii muhiimad dheeraad ah u leeyihiin dadka leh baahiyaha LEP marka la barbardhigo macluumaadka kale. Tallaabooyinka kaalmada luuqadeed waa in lagu salleeyaa waxa muhiimka ee macquulka ah ka dib marka la tixgeliyo falanqaynta afar-qodobleyda ah. Baaragaafyadan soo socda waxay si faahfaahsan u qeexayaan qayb kasta oo ka tirsan falanqeynta afar-qodobleyda ah.

### 1. Tirada ama qaybaha dadka qaba LEP ee u qalma in loo adeego ama laga yaabo in lala kulmo

Minnesota waxay hoy u tahay bulshooyinka dhaqan — oo mid kasta leeyahay taariikhdooda, astaamaha iyo baahiyahooda luuqadeed ee u gaarka ah. Heerarka fahamka Luuqadda Ingiriisida (iyo sidaas darteed baahiyaha kaalmada luuqadeed) aad bay u kala duwan yihiin. Xajmiga ama asalka bulshadu ka soo jeeddo khasab maahan inuu xiriir la yeesho heerka baahiyaha luuqadeed, taasina waa sababta ay muhiim u tahay in la helo xog isticmaal luuqadeed faahfaahsan si loo qorsheeyo oo loo horumariyo adeegyada kaalmada luuqadeed.

Shaxanka 1 wuxu guudmar ku sameeyaa dhaqanka aasaasiga ah ee bulshooyinka sida ay u qeexday Xarunta Dad Dhigista Gobolka Minneosta. Waxay bixisaa macluumaad ku saabsan dhaqamada aasaasiga ee bulshada, sida cabbirka bulshada, boqoleyda dadka ku dhashay meel ka baxsan waddanka Maraykanka, iyo boqoleyda inta qabta LEP. LEP waxa qiimeyntan loogu qeexi doonaa qof ka weyn da'da shan jir oo isu aqoonsan in uu luuqadda Ingiriisida ugu hadlo si ka yar "aad u fiican."

**Shaxan 1.** Soo Koobidda Astaamaha Dadawaynaha ee Bulshooyinka Dhaqameed ee Minnesota

| Koox Dhaqameed | Koox qowmiyadeed ama cunsureedka Xogta TIrokoobka | % Dadka | #Qof | # Qoysas | % Dhalas ho-ajanabi | % Leh caqabado luuqadeed (jira da'da 5+) |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Dakota | Hindi Maraykan | 0.1% | 6900 | 2500 | 2% | 0% |
| Ojibwe | Hindi Maraykan | 0.6% | 34300 | 13800 | 1% | 0% |
| Hindi Eeshiyaan | Eeshiyaan | 0.8% | 43000 | 15700 | 76% | 4% |
| Shiineys | Eeshiyaan | 0.5% | 27300 | 10200 | 74% | 17% |
| Filibiino | Eeshiyaan | 0.2% | 11500 | 3500 | 80% | 4% |
| Hmong | Eeshiyaan | 1.4% | 73700 | 16100 | 41% | 17% |
| Kuuriyaan | Eeshiyaan | 0.3% | 17000 | 6500 | 81% | 3% |
| Lao | Eeshiyaan | 0.2% | 12300 | 3000 | 62% | 25% |
| Fiitnaamiis | Eeshiyaan | 0.5% | 29600 | 8700 | 66% | 23% |
| Afrikaan-Maraykan | Madoow | 3.4% | 182400 | 74300 | 0% | 0% |
| Itoobiyaan | Madoow | 0.4% | 23000 | 7700 | 69% | 9% |
| Laybeeriyaan | Madoow | 0.3% | 15900 | 4900 | 70% | 2% |
| Somali | Madoow | 0.9% | 48800 | 14800 | 59% | 20% |
| Maksikaan | Hisbaanik | 3.3% | 178200 | 46400 | 38% | 18% |
| Boortoriikan | Hisbaanik | 0.2% | 11000 | 3400 | 10% | 7% |
| Af Ruush | Caddaan | 0.9% | 47900 | 18000 | 18% | 5% |
| Caddaan | Caddaan | 80.3% | 4376600 | 1934400 | 2% | 0% |
| *Hindi Maraykan Kale* | *Hindi Maraykan* | *0.2%* | *12600* | *5600* | | |
| *Eeshiyaan Kale* | *Eeshiyaan* | *0.6%* | *31400* | *9500* | | |
| *Madoow Kale* | *Madoow* | *0.6%* | *30000* | *14700* | | |
| *Hisbaanik Kale* | *Hisbaanik* | *1.2%* | *62700* | *18800* | | |
| *Cid Kale (ay ku jiraan Baasifik Aylaandar)* | | *0.1%* | *7400* | *2200* | | |
| *Kooxo Dhaqameed Dhowr ah* | | *3.1%* | *167500* | *35000* | | |
| **Dhammaan reer Minneosta** | | **100.0%** | **5450900** | **2269700** | **8%** | **2%** |

*Caqabadda luuqadeed waxa lagu qeexay dadka soo gudbiya inay ku hadlaan luuuqadda Ingiriisida oo ka hooseysa mid "aad u fiican"
Dhammaan xogta ku jirta shaxankan waxa laga keenay Xarunta Dad Dhigista Gobolka ee 2018 "Xaaladda Dhaqaale ee Reer Minnesota" Warbixinta waxa laga helayaa
https://mn.gov/admin/assets/MNSDC_EconStatus_2018Report_FNL_Access.pdf_tcm36-362054.pdf

### *Luuqadaha Caadiyan Lagu Hadlo iyo Asalka Bulshooyinka Qaba LEP*

Si waafaqsan qiyaasaha laga helay Ra'yi Uruurinta Bulshooyinka Maraykanka[1] (ACS), dadwaynaha Minnesota wuxu ka kooban yahay 2.2 milyan oo qoys. Qiyaastii 260,000 ama ku dhowaad 12% qoysaska, badanaa guriga kaga hadla luuqad aan ahayn Ingiriisi. In ka badan 50,000, ama 2.4% qoysaska, ayaa fahamkooda Ingiriisidu xaddidan yahay.

---

[1] Golaha Ra'yi Uruurinta Dadwaynaha ee Shaxannada, Shaxanada Ra'yi Uruurinta Bulshada Ameerikaanka ID S1602, "Limited English Speaking Households 2019: ACS 5-Year Estimates Subject Tables" La helay 1/13/2021.

Shaxanka 2 wuxu soo koobaa luuqadaha inta ugu badan loogaga hadlo guryaha Minnesota sida ku xusan qiyaasaha Ra'yi Uruurinta Bulshada Mareykanka (ACS) iyo xogta isqorista dadwaynaha ee Waaxda Waxbarashada Minnesota[2] (MDEP)

**Shaxan 2.** Soo koobida luuqadaha ugu badan ee lagaga hadlo guryaha Minnesota.

| Koox luuqadeed | *2015-2019 ACS Qiimeyn 5-Sannadood ah* | | *MDE 2019-2020 Xogta Isqorista* | | |
|---|---|---|---|---|---|
| | **Qiyaasta wadarta tirada qoysaska ee luuqadda aasaasiga ah** | **Qiyaasta wadarta tirada qoysaska leh LEP** | **Magaca Luuqadda** | **2019-2020 Isqorista Dugsiyada Dawladda ee Luuqadda Aasaasiga ah** | **Boqoleyda wadarta isqorista** |
| Isbaanish | 82811 | 15716 | Isbaanish | 51396 | 5.9% |
| Luuqadaha kale ee Indho-Yurubiyaan | 58999 | 6468 | Af Ruush | 2493 | 0.3% |
| Luuqadaha Eeshiyaanka iyo Baasifika Aylaandiska | 64568 | 14507 | Hmong | 20362 | 2.3% |
| | | | Karen | 4418 | 0.5% |
| | | | Fiitnaamiis | 3923 | 0.4% |
| | | | Shiineys, Mandariin | 2508 | 0.3% |
| Dhammaan luuqadaha kale | 54810 | 15931 | Somali | 27989 | 3.2% |
| | | | Carabi | 3311 | 0.4% |
| | | | Oromo, Afaan Oromo, Oromiffa | 2581 | 0.3% |

### *Kala-duwanaanshah goobeed ee Dadka LEP*

Sida ku xusan qiyaasihii ACS ee u dambeeyay, waxa jira 12 degmo oo gobolka Minnesota ah kuwaasoo dadka leh baahiyaha LEP ay ka badan yihiin boqolkiiba shan wadarta dadkooda ama 1,000 qof/400 ee qoysba. Shaxanka 3 wuxu soo koobayaa qiyaasta wadarta tirada iyo boqoleyda qoysaska lagu calaamadeyay LEP ee 12kaas degmo.

---

[2] Waaxda Waxbarashada Minnesota, Xarunta Xogta MDE: Warbixinada iyo Falanqeynta Xogta, "2019-2020 Primary Home Language Totals" La heli karo 1/06/2021.

**Shaxan 3.** Soo koobidda degmooyinka leh qoysaska LE oo ka badan shan boqolkiiba ama 400 oo qoys, sida ku xusan qiimeyntii 5-sannadoodleyda ahayd ee ACS 2019.

| Magaca degmada | Qiyaasta Wadarta tirada qoysaska leh LEP | Khaladka Jiri Kara (MOE) Wadarta LEP | Qiyaasta Boqolkiiba LEP | MOE Qiyaasta Boqolkiiba LEP |
|---|---|---|---|---|
| Hennepin | 18804 | ±1038 | 3.7% | ±0.2% |
| Ramsey | 11395 | ±746 | 5.5% | ±0.4% |
| Dakota | 4421 | ±472 | 2.7% | ±0.3% |
| Anoka | 2629 | ±315 | 2.1% | ±0.2% |
| Olmsted | 1767 | ±314 | 2.8% | ±0.5% |
| Stearns | 1476 | ±326 | 2.5% | ±0.6% |
| Scott | 1209 | ±203 | 2.4% | ±0.4% |
| Mower | 1149 | ±203 | 7.4% | ±1.3% |
| Washington | 1019 | ±206 | 1.1% | ±0.2% |
| Nobles | 884 | ±196 | 11.0% | ±2.4% |
| Rice | 766 | ±185 | 3.3% | ±0.8% |
| Kandiyohi | 655 | ±188 | 3.9% | ±1.1% |

Shaxanka 4 ee hoose, wuxu muujinayaa boqoleyda dadka luuqadda si aasaasiya ugu hadla (sida ku xusan xogta MDE 2019-2020[3]) iyo boqolleyda dadka luuqadda ku hadla ee fahamkooda Ingiriisidu xaddidan yahay (si waafaqsan qiimeynta shanta sannadoodleyda ah ee ACS 2019) ee shanta luuqadood ee aan Ingiriisida ahayn ee ugu badan ee lagaga hadlo Minnesota. Xogtani waxay muujineysaa kala-duwanaanshaha ballaaran ee dhanka kooxaha luuqadaha kala duwan ee u dhexeeya degmooyinka, iyo sidoo kale kala-duwanaanshaha boqoleyda dadka qaba baahiyaha luuqadeed ee LEP ee koox luuqadeedka gudaheeda. Marka la isku qaado, waxay fikir ka bixineysaa suurtogalnimada ay barnaamijyada iyo adeegyada DNR kula kulmi karaan dad leh baahiyaha LEP oo laga yaabo inay u baahdaan adeegyada kaalmada luuuqad ee koox kasta.

---

3 Xogta ku saabsan luuqadaha guriga lagaga hadlo ee aasaasiga ah ee ardayda dhigata dugsiyada dadweynaha ee ay soo aruurisay MDE waxay tilmaamaysaa baaxadda bulshooyinka LEP ee haysta carruurta da'da dugsiga ku jira ee ka diiwaangashan dugsiyada dadweynaha ee degmada laakiin ma matalo degmada oo dhan. Isbarbardhigga tooska ah ee qiyaasaha ACS iyo xogta MDE ee qoysaska afkooda aasaasiga ahi yahay Isbaanishka (kooxda luuqadeedka keliya ee si toos ah loo barbar dhigi karo labada qaybo xogeedba) waxay soo jeedinaysaa in xogta isqorista dugsiyada dadweynaha ee MDE ay u janjeerto inay si xad dhaaf ah u matasho dadka ku hadla Isbaanishka marka la fiiriyo natiijooyinka iyadoo lagu salaynayo muunado koobsanaya ah gobolka oo dhan. Lama oga inay tani run ku tahay luuqado kooxeedyada kale. Jaantuska 1a-e waxa uu muujinayaa qaybinta juqraafiyeed iyo goobaha asalka ah ee shanta luuqadood ee ugu badan ee aan Ingiriisiga ahayn ee ardayda Minnesota kaga hadlaan guriga.

**Shaxan 4.** Soo koobidda luuqadda degmada oo sharraxaysa boqolleyda lagu qiyaasay inay luuqad kasta oo aasaasi ah kaga hadlaan dadka degmo kasta iyo boqolleyda kuwa ku hadla luuqadda aasaasiga ah ee leh baahiyaha LEP ee gobollada dadkooda lagu qiyaasay inay ka badan yihiin boqolkiiba shan inay leeyihiin LEP ama 400 oo qoys oo leh LEP.

| Magaca degmada | MDE Isbaanish % | ACS Isbaanish LEP% | ACS Isbaanish LEP % MOE | MDE Soomaali % | ACS LEP Kale % | ACS LEP Kale % MOE | MDE Hmong % | MDE Karen % | MDE Fiitnaamiis % | ACS A LEP |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Hennepin | 9.5% | 19.6% | ±2.1% | 6.3% | 31.0% | ±2.7% | 2.7% | 0.0% | 0.6% | 19. |
| Ramsey | 7.5% | 23.1% | ±3.6% | 5.4% | 34.4% | ±4% | 13.3% | 3.8% | 0.6% | 30. |
| Dakota | 7.8% | 17.3% | ±3.9% | 3.5% | 29.5% | ±5.6% | 0.3% | 0.0% | 0.8% | 18. |
| Anoka | 5.6% | 18.8% | ±3.7% | 1.7% | 19.5% | ±4.4% | 2.8% | 0.0% | 1.1% | 16. |
| Olmsted | 5.1% | 19.1% | ±8% | 4.8% | 29.0% | ±8.5% | 0.4% | 0.0% | 0.8% | 27. |
| Stearns | 4.5% | 16.6% | ±5.7% | 13.3% | 48.4% | ±11% | 0.0% | 0.0% | 0.4% | 16. |
| Scott | 4.8% | 17.2% | ±6.8% | 1.9% | 15.6% | ±10.3% | 0.1% | 0.0% | 1.1% | 18. |
| Mower | 16.2% | 49.5% | ±9.7% | 0.0% | 62.0% | ±19.5% | 0.0% | 2.2% | 0.4% | 58. |
| Washington | 2.7% | 10.9% | ±3.7% | 0.6% | 16.0% | ±6.9% | 2.2% | 0.0% | 0.5% | 9.8 |
| Nobles | 37.7% | 41.0% | ±9% | 0.0% | 38.4% | ±35.7% | 0.0% | 3.0% | 0.2% | 35. |
| Rice | 13.2% | 31.8% | ±10.1% | 9.8% | 46.9% | ±14% | 0.0% | 0.0% | 0.4% | 23. |
| Kandiyohi | 16.7% | 16.4% | ±9.1% | 12.3% | 63.0% | ±24.8% | 0.0% | | | 64. |


Jaantuska 1a-e khariirado muujinaya qaybinta juqraafiyeed iyo goobaha asalka ah ee shanta luuqadood ee ugu badan ee aan Ingiriisiga ahayn ee ardayda MN kaga hadlaan guriga (boqolley keli ah).



Boqolayda ardayda ee Gobolkiiba kuwaas oo sheega in luuqada koowaad ee ay guriga kaga hadlaan tahay Isbaaniish.

- <1% ardayda luuqada koowaad ee ay guriga kaga hadlaan waa Isbaanish
- 1% - 4% ardayda luuqada koowaad ee ay guriga kaga hadlaan waa Isbaanish
- 5%-10% ardayda luuqadooda koowaad ee guriga kaga hadlaan tahay Isbaanish
- 11%-20% ardayda luuqada koowaad ee ay guriga kaga hadlaan waa Isbaanish
- >20% ardayda luuqada koowaad ee ay guriga kaga hadlaan waa Isbaanish (ugu badnaan 38%)


a.



Boqolayda ardayda ee Gobolkiiba kuwaas oo sheega in luuqada koowaad ee ay guriga kaga hadlaan tahay Soomaali.

- <1% ardayda luuqada koowaad ee ay guriga kaga hadlaan waa Soomaali
- 1% - 4% ardayda luuqada koowaad ee ay guriga kaga hadlaan waa Soomaali
- 5%-10% ardayda luuqadooda koowaad ee guriga kaga hadlaan tahay Soomaali
- 11%-20% ardayda luuqada koowaad ee ay guriga kaga hadlaan waa Soomaali (ugu badnaan 13%)


b.



Boqolayda ardayda ee Gobolkiiba kuwaas oo sheega in luuqada koowaad ee ay guriga kaga hadlaan tahay Karen.

- <1% ardayda luuqada koowaad ee ay guriga kaga hadlaan waa Karen
- 1% - 4% ardayda luuqada koowaad ee ay guriga kaga hadlaan waa Karen
- 5%-10% ardayda luuqadooda koowaad ee guriga kaga hadlaan tahay Karen (ugu badnaan 13%)

b.



Boqolayda ardayda ee Gobolkiiba kuwaas oo sheega in luuqada koowaad ee ay guriga kaga hadlaan tahay Fiitnaamis.

- <1% ardayda luuqada koowaad ee ay guriga kaga hadlaan waa Fiitnaamis
- 1% - 4% ardayda luuqada koowaad ee ay guriga kaga hadlaan waa Fiitnaamis

d.




- <1% ardayda luuqada koowaad ee ay guriga kaga hadlaan waa Hmong
- 1% - 4% ardayda luuqada koowaad ee ay guriga kaga hadlaan waa Hmong
- Ma jiraan gobolo sheegaya in 5%-10% ardayda luuqadooda koowaad ee guriga kaga hadlaan tahay Hmong
- 11%-20% ardayda luuqada koowaad ee ay guriga kaga hadlaan waa Hmong (ugu badnaan 13%)

e.

## 2. Inta jeer dadka leh baahiyaha LEP ay la kulmaan DNR

DNR waxay sida ugu saxan ee suurtogalka ah u qiimeyn doonaan, inta jeer ay la kulmaan dadka leh baahiyaha LEP ee raadinaya kaalmo. Macluumaadka waxaa soo ururin doona shaqaalaha DNR ee si joogto ah ula falgala xubnaha bulshada. Tusaale ahaan, Xarunta Macluumaadka DNR waxay sii wadi doontaa in la ogaado marka qofka soo wacaya uu macluumaadka ku codsado luuqad kale. Baahida adeegyada luuqaddu waxay ku salaysnaan doontaa:

- Inta jeer ee shaqaaluhu la xiriiraan koox luuqadeed.
- Inta jeer ee shaqsiyaad leh LEP ay adeegyo ka soo raadsadaan barnaamijka.
- Nooca adeegyada luuqadda ee loo baahan yahay.

## 3. Nooca iyo muhiimada uu u leeyahay nolosha dadka barnaamijka, hawsha, ama adeega ay bixiso DNR

DNR waxay, si joogto ah, u kala hormarin doontaa kheyraadka iyo agabka lagu bixiyo luuqadaha aan Ingiriisiga ahayn. Shuruudaha kala-horumarinta waxa ka mid ah:

1. In macluumaadku muhiim u yahay Helitaanka ama fahmitaanka adeegyada ama dheefaha dawladda dhexe bixiso.
2. In xaalado xog la'aaneed ay saameyn weyn ku yeelan karaan caafimaadka ama badbaadada shakhsiyaadka leh LEP.

3. Dukumeenti ama xiriir sharci ahaan qasab ah; xaaladaha ay macluumaad la'aantu keeni karto ciqaabaha madaniga ama dambiyada ama iyadoo ka qayb ah baaritaanada dhaqangelinta sharciyeed.
4. Dukumeentiyada qofka ku keeni kara cawaaqib kale oo daran haddii aanay fahmin macluumaadka.

Noocyada kale ee xiriirada, faham wax ku ool ah wuxu u baahan yahay ka warqabka jiritaanka barnaamijka. Xaalado badan, wacyigelin la'aanta barnaamijku waxay u diidi kartaa shakhsiyaadka leh LEP faham ama helitaan macquul ah. Tusaale ahaan, la'aanta dukumeentiyo ama agab la turjumay ee bandhigga jardiinooyinka gobolka ayaa laga yaabaa inay ka hor istaagto kooxaha inay bartaan astaamaha dabiiciga ah iyo kuwa dhaqameed ee aagga. Si kastaba ha ahaatee, waxa ay noqon doontaa wax aan macquul ahayn in dhammaan dukumeentiyada ama agabka wacyigelinta DNR loo turjumo luuqad kasta. Ciwaanka VI tan kuma waajibinayo cidda hesha kaalmada dhaqaale ee federaalka, oo Amarka Fulinta 13166 kuma waajibinayso hay'adaha federaalka. Waa muhiim in DNR ay si joogto ah u qiimeyso baahiyaha dadka adeega u qalma si loo go'aamiyo in dukumeentiyada ama agabka wacyigelinta la turjumayo iyo, haddi ay sidaas tahay, dukumeentiga ama agabka la turjumayaa wuxu noqonayo.

### 4. Agabka iyo dukumeentiyada laga heli karo DNR iyo qarashka kaalmada luuqadeed.

Ilaha la heli karo ee DNR iyo kharashyada bixinta adeegyada kaalmada luuqadda ayaa laga yaabaa inay saameeyaan tillaabooyinka la qaaday si shakhsiyaadka leh LEP faham macno gal ah loo siiyo. Iyadoo dadaallada kaalmada luuqadda loo qaadan karo wax aan macquul ahayn haddii kharashyada bixinta gargaarku si weyn uga badan yihiin faa'iidooyinka, DNR waxay sahamin doontaa habab kharash-ool ah oo lagu bixiyo adeegyo luuqadeed oo ku filan oo sax ah ka hor inta aan adeegyada loo xaddidin caqabado kheyraad dartood. Qaybaha, barnaamijyada iyo gobolladu waa inay diiwaangeliyaan falanqayntooda marka caqabad kharash u cuskanayaan inay xaddiday adeega kaalmada luuqadda.

## Soo uruurinta xogta luuqad xulashada

Si faham waxgal ah looga bixiyo barnaamijyada iyo adeegyada, waxaa lama huraan ah in DNR awood u yeelato inay aqoonsato baahiyaha luuqadda ee shakhsiyaadka iyo bulshada ay u adeegto.

Habab badan ayaa loo isticmaali karaa in lagu garto shakhsiyaadka leh  LEP, oo ay ku jiraan:

- Wacyigelinta, ka-qaybgalka iyo dhisida xidhiidhka daneeyayaasha
- Isku-dubbaridka hay'adaha iskaashiga
- Dib u eegista xogta ama macluumaadka laga soo ururiyay xiriirkii horey loola yeeshay shakhsiyaadka leh LEP
- Falanqaynta macluumaadka tirakoobka ee barnaamijka ku habboon

Iskuduwaha LA iyo Kooxda Hirgelinta Helitaanka ama fahmitaanka Luuqadda ayaa sidoo kale horumarin doona cilaaqaad caawin kara DNR guud ahaan.

Agaasimayaasha qaybta DNR waa in ay hubiyaan in qaybahooda ay hayaan diiwaannada faahfaahsan ee

adeegyada LEP ee ay bixiyaan. Hagitaanka xafidaada diiwaanka iyo warbixinta soo socota waxaa bixin doona Iskuduwaha LA. Xogtan waxaa loo isticmaali karaa in lagu caawiyo go'aaminta heerka adeegyada LEP e loo baahan yahay, in la qiimeeyo isbeddellada, iyo in la sameeyo talooyinka ku habboon hoggaanka qaybta ee ku saabsan agabka loo baahan yahay si loo taageero fahamka luuqadeed. DNR waxay takoorka ka mamnuucday dhammaan adeegyadeeda iyo hawlaheeda mana isticmaali doonto wax macluumaad ah oo laga soo ururiyo shakhsiyaadka leh LEP si loogu takooro kooxaha ama shakhsiyaadka. Intaa waxaa dheer, DNR ulama dhaqmi doonto xaaladda socdaalka mid ku habboon go'aaminta haddii shakhsigu u qalmo adeegyada LEP ee lagu qeexay Qorshahan.

## Doorashada Adeegyada Caawinta Luuqadda

Sida kor lagu xusay qaybta Falanqaynta Afarta Qodob, DNR waxay qaadi doontaa tallaabooyin macquul ah si loo hubiyo in dukumentiyada muhiimka ah la turjumay ama lagu turjumay luuqadaha shakhsiyaadka qaba LEP ee ay saameynayaan ama aad u xiisaynaya dukumentiyadan. DNR waxay sidoo kale qaadi doontaa tallaabooyin macquul ah si loo hubiyo in xiriiradu dhacaaan ama la qabto iyadoo la adeegsanayo shirkada turjumaan hadal ama turjumaan qoraal oo qandaraas haysata, ama xubno shaqaale ah oo luuqado badan ku hadla.

Guud ahaan, tarjumaadda hadalka  waxaa loo adeegsadaa luuqadda lagu hadlo waqtiga dhabta ah halka tarjumaadda qoraalku ay diiradda saarto nuxurka qoran. Labaduba waa xeelado laga yaabo inay isticmaalaan DNR si ay u bixiyaan fahamka luuqadeed. Gobolka Minnesota wuxuu leeyahay qandaraasyo heer sare ah oo loogu talagalay khadadka luuqadda (turjumaadda taleefanka), turjumaada hadalka tooska ah iyo adeegyada tarjumaada qoraalka ah.

Marka la dooranayo adeegyada kaalmada luuqadda la isticmaalayo, DNR waxa laga yaabaa inay tixgeliso qiimaha iyo muhiimadda macluumaadka. Tusaale ahaan, haddii uu kharash ama wakhtigu mamanuucayo in la turjumo tiro badan oo sharciyo ah,DNR waxa laga yaabaa inay adeegsato xariiq luuqadeed sida hoos lagu sharraxay si loo hubiyo in shakhsiga LEP qabaa uu u awoodo inuu ku helo macluumaadka luuqaddooda koowaad.

Qaar ka mid ah isdhexgalka uu DNR la yeesho dadweynaha waa mid aad u fudud, sida iibsashada ogolaanshaha baarkinka ama hubinta shatiga ee Sarkaalka Ilaalinta Deegaanka. Turjubaanka waxaa laga yaabaa inaan looga baahnayn dhammaan kiisaska, laakiin shaqaalaha la falgala dadweynaha waa inay bixiyaan ogeysiis ah in adeegyada luuqadda la heli karo oo ay ka jawaabayaan codsiyada adeegga luuqadda.

### Turjumaadda Hadalka

Turjumaadda hadalku waxay  ku lug leedahay dhegaysashada macluumaad hal luuqad ku baxay (luuqadda laga soo turjumayo) iyo in hadal ahaan loogu badalo luuqad kale (luuqadda loo turjumayo) iyada oo la bixinayo macne isku mid ah. DNR waxay isticmaashaa turjubaano karti leh si ay u siiso adeegyo wax ku ool ah shakhsiyaadka qaba LEP. Turjumaanada karti leh waxay muujiyaan:

- Aqoonta Ingiriisiga iyo luuqadda wax loo turjumayo labadaba.
- Tababar ay ku jiraan xirfadaha iyo anshaxa tarjumaada.
- Aqoonta aasaasiga ah ee labada luuqadood ee eray kasta ama fikradaha gaar ah.

- Xasaasiyadda dhaqanka ee labada luuqadood.

Macluumaadka hoose waa in la tixgeliyo marka ay lagama maarmaanka tahay in la isticmaalo turjumaan luuqad si loo bixiyo helitaan micno leh ee barnaamijka ama adeegga DNR.

### *Tixgelinta guud*

1. **Diiwaangelinta marka turjumaan la isticmaalay**. Shaqaalaha DNR waa in ay qoraan marka turjubaan la isticmaalayo ama marka daneeyahu uu isticmaalo nooc kale oo ah kaalmada luuqadda. Marka la hirgeliyo arintan, waxaa lagu dari karaa hababka diiwaan-gelinta caadiga ah.
2. **Isticmaal adeegyada turjubaanka ee turjumaanka tooska ah, haddii loo baahdo.** Haddii loo baahdo turjumaanka qof ahaan halkii laga heli lahaa telefoon, shaqaaluhu waa inay diyaariyaan turjubaan la heli karo wakhti iyo goob ku habboon turjubaanka iyo daneeyaha labadaba.
3. **Xaqiiji aqoonsiga daneeyayaasha**. Kahor intaadan siideyn xogta gaarka ah ee kiis  gaar ah, shaqaalaha DNR waa inay xaqiijiyaan aqoonsiga daneeyaha. Shaqaalaha ku hadla luuqadaha badan, adeegyada khadka luuqadda, shaqaalaha ama iibiyeyaasha bixiya adeegyada tarjumaada hadalka ama tarjumaada qoraalka qandaraasyada lala galayo ee gobolka ayaa laga yaabaa inay ka caawiyaan shaqaalaha DNR xaqiijinta.
4. Is dhexgalka shakhsiyaadka qaba LEP waxa laga yaabaa inay ka dhacaan meelo fogfog oo ay xaddidan tahay Helitaanka ama fahmitaanka taleefoonka ama turjumaanada gudaha. Shaqaalaha DNR waa in ay hubiyaan in dabagal loo baahan yahay iyo in ay hadhow ku dhici karto kaalmada luuqadda.

### *Dukumeentiyada ama agabka Turjubaanka*

Inta ugu badan ee suurtogalka ah, shaqaaluhu waa inay isticmaalaan adeegyada turjubaanka si ay u yareeyaan kharashaadka una kordhiyaan xawaaraha adeeg bixinta :

**Shaqaalaha DNR ee luuqadaha badan ku hadla**– Maamulayaasha DNR waxa laga yaabaa inay u gudbiyaan shakhsiyaadka leh LEP shaqaale ku hadla luuqado badan oo ku hadla luuqadooda haddii shaqaalahaas ay joogaan oo laga heli karo aagga barnaamijka.

**Adeegyada turjumaanka telefoonka (Language Line)** – Adeegyada khadka luuqaddu waxay bixiyaan tarjumaad taleefan oo ku baxa in ka badan 200 oo luuqadood, 24-saacadood maalintii, todobada maalmood ee usbuuca. Shaqaaluhu waa inay adeegsadaan adeegyada khadka luuqadda marka aan la heli karin shaqaale ku hadla luuqado badan, marka luuqaddu tahay mid aan inta badan lagula kulmin DNR, ama marka shaqaaluhu aanay hubin luuqadda uu qofku ku hadlo. DNR-da waxa lagu dalacayaa si ku salaysan hal daqiiqo ee isticmaalka adeeggan turjubaanka. Shaqaalaha DNR waa in ay bartaan habka tarjumaada adeegyada khadka luuqadda ka hor inta aysan isticmaalin.

**Toos, adeeg turjumaan qandaraasle ah** – Waaxda Maamulka ee Minnesota waxay haysaa qandaraas heer gobol oo dhan ah oo loogu talagalay tarjumaada luuqadda lagu hadlo iyo adeegyada la xiriira. Qandaraaslayasha haysta qandaraaska guud ee Turjumaadda Luuqadaha Hadalka iyo Adeegyada La Xiriira ee gobolka oo dhan waxaa lagu doortay habraaca Codsiga Soo jeedinta (RFP). Iibiyeyaashu waxay bixiyaan turjumaad dukumeenti ah, adeegyo soosaar maqal iyo muuqaal ah, iyo adeegyo kale oo la xiriira tarjumaada. Adeegyada, qiimayaasha, iyo wakhtiga soo celinta waxay ku kala duwan yihiin iibiyaha iyo codsiga degdegga ah. Iibiyeyaashani waa inay u

hoggaansamaan xeerka anshaxa iyo heerarka aqoonta. DNR waa inuu lahaadaa heshiis xog wadaag ah oo lala yeesho qandaraasleyaasha si ay ula wadaagaan macluumaadka gaarka ah ama qarsoodiga ah. Shaqaalaha DNR ee raba in dukumeenti la tarjumo ama abuuraan qoraal la turjumay iyo cod ama cajalad waa inay la xidhiidhaan qaybta wax iibsiga.

*Ugu tiirsanaanta Qoyska, Saaxiibada, ama Carruurta Yaryar Turjubaano ahaan*

Kuwa soo socda ayaa ah tixgalinta xaaladaha uu shaqsiga LEP qaba u rabo saaxiib ama xubin qoyska ka mid ah inay u turjumaan iyagu:

- Ilaalinta sirta iyo saxnaanta tarjumaada waa in had iyo jeer ay ahaataa welwelka ugu sarreeya, gaar ahaan haddii isdhexgalka uu khuseeyo mowduucyo laga yaabo inay ku lug yeeshaan xadgudubyada sharciga ama qaar si xun u saameeynayaa u-qalmitaanka adeegyada.
- Had iyo jeer bixi adeeg turjubaan bilaash ah, maadaama shaqsiga LEP qaba laga yaabo inuusan ka warqabin fahmitaanka ama helitaanka adeegyada turjubaanka.
- Haddii shaqsi LEP qabo uu doorbido in xubin qoyska ka mid ah ama saaxiib uu u noqdo turjubaan ahaan, weydii haddii shakhsigu u oggolaan doono turjumaan tababaran inuu dhageysto si loo hubiyo saxsanaanta tarjumaada. Haddii qoyska ama saaxiibada ay tarjumaan, wicitaanada dabagalka ama waraaqaha waa in ay sameeyaan shaqaale luuqado badan ku hadla, shaqaalaha adeegyada khadka luuqadda ama qandaraaslayaasha..
- Ka fogow in aad ugu tiirsanaato carruurta yaryar turjumaan ahaan. Waa inaan loo isticmaalin xaaladaha xuquuqaha ama helitaanka ama fahmitaanka adeegyada muhiimka ah ay saameyn ku yeelan karto.
- Shaqaalaha DNR ee luuqadaha badan ku hadla ama tarjumaanada qandaraaska haysta ayaa la doorbidaa xaaladaha qofka LEP qaba ay tahay inuu ka jawaabo su'aalo adag ama faahfaahsan. Shaqaalaha ku hadla luuqadaha badan ama turjubaanada qandaraaska haysta waa in loo adeegsadaa xaaladaha marka shaqsiga LEP qaba uu bixinayo macluumaad si xun u saameeya u qalmitaankooda adeegyada, oo ay ku jiraan waqtiyada kama dambaysta ah ama shahaadooyinka, ama marka ay jirto ku xad gudub sharciga ah.
- Haddii macluumaadka gaarka ah la shaaciyo, fadlan tixraac shuruudaha Xeerka Dhaqanada Xogta ee Dowladda Minnesota.

## Turjumaada Qoran

DNR waa inay sameeyaan dadaalo firfircoon si ay u turjumaan dukumeentiyada muhiimka ah iyo kuwa aan muhiimka ahayn labadaba iyo gudbinta macluumaadka . Dukumeentiyada muhiimka ah waxaa ka mid ah codsiyada barnaamijka; ogolaanshaha iyo foomamka cabashada; iyo shatiga iyo oggolaanshaha codsiyada/ogaysiisyada iyo ogeysiisyada ku saabsan dhimista, diidmada, ama joojinta adeegyada/ faa'iidooyinka iyo xaqa aad u leedahay in aad rafcaan ka qaadato tallaabooyinkaas.

Barnaamijyadu waa inay tixgeliyaan falanqaynta afar-geesoodka ah, sida tirada iyo meesha ay ku nool yihiin dadka LEP iyo luuqadaha lagu hadlo. Marka la eego dukumeentiyada aan muhiimka ahayn ee loogu talagalay wacyigelinta dadweynaha ama dhagaystayaal ballaadhan, qayb kasta iyo xafiiska barnaamijku waa in uu tarjumaa halka boqolkiiba wax ku oolka ah ee dadweynaha loo adeegayo ama ay saameeynaya hawlaha xafiisyada.

Iyadoo aan farsamo ahaan ahayn dukumeenti, calaamaduhu waa hab muhiim u ah DNR si uu ugu gudbiyo macluumaadka dadweynaha. Calaamadaha waxaa loo isticmaali karaa in lagu bixiyo tilmaamo, macluumaadka caafimaadka iyo badbaadada, ogaysiinta xeerarka iyo xeerarka ama macluumaadka taariikhda ama dhaqanka muhimka ah. Farimaha sawirka waxaa loo isticmaali karaa in lagu gudbiyo macluumaadka dadka ku hadla luuqado kala duwan waxaana laga yaabaa inay aad waxtar ugu yeeshaan calaamadaha jihada iyo badbaadada qaarkood.

Waxa lagu talinayaa in barnaamijyadu ay caddeeyaan mudnaanta ay u leeyihiin tarjumaada dukumentiyada sannad kasta iyadoo lagu saleynayo hay'adda falanqaynta afar-geesoodka ah ee qorshahan ku jirta iyo barnaamijkooda. Kuwa soo socda ayaa ah tixgalin dheeri ah oo ku saabsan tarjumaada qoran:

- Barnaamijyo iyo adeegyo badan oo DNR ah ayaa u furan ama u adeega qof kasta oo jooga Gobolka Minnesota iyo wixii ka dambeeya. Barnaamijyada si gaar ah ugu qalma una habboon, tixgelinta marka la bixinayo tarjumaad qoraal ah waxaa loo xisaabin karaa boqolkiiba dadka xaqa u leh.
- Waxa laga yaabaa inaanay suurtogal ahayn in la tarjumo dhammaan dukumentiyada. DNR waxa laga yaabaa inay u baahato inay go'aamiso mudnaanta agabka in si firfircoon loo turjumo ama in macluumaadka afka loo gudbiyo. DNR waxa kale oo laga yaabaa inay tixgeliso kooxaha ugu badan ee isticmaala barnaamijyada iyo adeegyada DNR. Tusaale ahaan, qaar ka mid ah bulshooyinka soogalootiga ah waxay leeyihiin dhaqamo ugaarsi iyo kalluumeysi oo xooggan halka kuwa kalena laga yaabo inaysan lahayn.
- Turjumaada dukumentiyada sidoo kale waxaa lagu bixin karaa hadal ahaan.

### *Habka Habboon ee Turjumaada Qoran*

Waaxda Arrimaha Gudaha ee Mareykanka (DOI) ayaa siisay hagitaan loogu talagalay helayaasha maalgelinta dowladda dhexe si loo go'aamiyo marka la bixinayo tarjumaad qoraal ah oo dukumeenti muhiim ah. Waxay tixraaceen hagidda Waaxda Caddaaladda ee Mareykanka (DOJ), taasoo u qoondaysay dekedda nabdoon ee bixinta turjumaada qoran. Qodobadan safe harborka ah waxay khuseeyaan oo kaliya tarjumaadaha dukumentiyada qoran mana saameeyaan shuruuda ah in la siiyo galaangal macno leh shaqsiyaadka qaba LEP iyada oo loo marayo turjubaano afka ah oo karti leh halkaas oo adeegyada kaalmada afka looga baahan yahay oo macquul ah.

Ficilada soo socda ayaa loo arkaa caddayn adag oo ku saabsan u hoggaansanaanta waajibaadka tarjumaada qoran ee DNR:

- DNR waxay siisaa tarjumaad qoraal ah oo dukumiintiyo muhiim ah koox kasta oo u qalanta luuqadda LEP oo ka kooban boqolkiiba shan ama 1,000, hadba mid ka yar, dadka u qalma in loo adeego ama ay u badan tahay in la saameeyo ama la kulmo, ama
- Haddii ay jiraan wax ka yar 50 qof oo ku jira koox luuqadeed oo gaadhay heerka ugu hooseeya ee boqolkiiba shan sida lagu qeexay cutubka hore, DNR waxay ku siinaysaa ogeysiis qoraal ah luuqadda koowaad ee kooxda luuqadda LEP xaqa ay u leeyihiin inay helaan tafsiir afka ah oo karti leh oo ah agab qoran oo muhiim ah. , bilaash ah.

Ku guuldareysiga in la bixiyo turjumaad qoraal ah iyadoo loo eegayo duruufaha lagu tilmaamay safe harbor ah

macnaheedu maaha inay jirto u hoggaansanaan la'aan. Hase yeeshe, macluumaadkan waxaa loogu talagalay hage si loo hubiyo u hoggaansanaanta ka weyn ee lagu bixin karo falanqaynta afar-geesoodka ah. Guud ahaan, muhiim ma aha in la tarjumo dukumentiyada muhiimka ah marka ay aad u culus tahay in laga adkaado ujeedooyinka sharciga ah ee barnaamijka. Siyaabaha kale ee lagu bixiyo helitaan macno leh, sida tafsiir afka ah oo wax ku ool ah oo ku saabsan dokumentiyada muhiimka ah qaarkood, ayaa laga yaabaa in la aqbalo xaaladahan oo kale.

# Ilaalinta Mawduucyada Qarsoodiga ah/ Ilaalinta Qarsoonaanta Xogta

## Fahamka ugu yar ee lagama maarmaanka u ah xogta

DNR iyo qandaraaslayaasheeda waa inay u hoggaansamaan heerarka fahamka ama helitaanka iyo shaacinta "ugu yar ee lagama maarmaanka ah" ee lagu dejiyay Xeerka Dhaqanada Xogta ee Dowladda Minnesota (MGDPA). Faafinta macluumaadka gaarka ah ama qarsoodiga ah waxay ku kooban tahay "ta lagama maarmaanka u ah maamulka iyo maareynta barnaamijyada gaar ahaan
oo ay awoodaan sharci-dejinta ama maamulka deegaanka ama ay u igmato dowladda federaalka." Arag Minnesota Xeerarka, Qaybta 13.05, subd. 3.

## Waajibka lagu hubinayo in si sax ah loo maamulo xogta

DNR ayaa mas'uul ka ah tababbarka shaqaalaha loo oggolaaday inay galaan oo isticmaalaan xogta la ururiyey.

DNR iyo qandaraaslayaasheeda ayaa mas'uul ka ah tababbarka shaqaalaha loo oggolaaday inay ururiyaan, galaan, isticmaalaan, ilaaliyaan oo faafiyaan xogta lagu soo ururiyey shuruudaha, iyo ujeedooyinka lagu qeexay qandaraaska iyo heshiiska wadaagga xogta. Mas'uuliyaddan waxaa ka mid ah hubinta in shaqaalaha si sax ah loogu tababaray:

- Xeerka Dhaqanada Xogta ee Dawlada Minnesota (MGDPA), Xeerarka Minnesota cutubka 13.
- Sharci kasta oo kale oo khuseeya gobolka iyo federaalka, xeerarka, iyo qawaaniinta saameeya ururinta, kaydinta, isticmaalka iyo faafinta macluumaadka gaarka ah ama sirta ah.

DNR iyo qandaraaslayaasheedu waa inay:

- Aan loo isticmaalin ama aan si dheeraad ah loo shaacin macluumaadka oo aan ka ahayn sida uu sharcigu oggol yahay ama uu farayo.
- Isticmaal ilaalin habboon si aad uga hortagto isticmaalka khaldan ama siidaynta macluumaadka shaqaalaheeda iyo qandaraaslayaasheeda.
- Si habboon uga jawaab isticmaal kasta oo la yaqaan ama looga shakiyo isticmaalka khaldan ama siidaynta macluumaadka la ilaaliyo sida ay u baahan tahay Siyaasadda Maamulka Jebinta Xogta.
- Hubi in wakiilo kasta, falanqeeyayaasha iyo kuwa kale ee ay siiso xogta gaarka ah ama sirta ah ay ku heshiiyaan in lagu xidho isla xayiraadaha iyo shuruudaha iyaga khuseeya ee la xidhiidha macluumaadkaas.
  Marka la joojiyo heshiis kasta, kordhi ilaalinta heshiiska macluumaadka la ururiyey inta lagu jiro qandaraaska.

## Dabagalka/Qiimaynta

DNR waxay qiimayn doontaa Qorshaha sannad kasta oo kale si loo go'aamiyo waxtarkiisa guud. Iskuduwaha LA iyo Kooxda Hirgelinta Helitaanka ama fahmitaanka Luuqadda ayaa isku dubaridi doona qiimayntan. Qiimaynta waxaa ku jiri doonta:

- Qiimaynta dadka LEP ee hadda ee gobolka.
- Qiimaynta haddii adeegyada kaalmada luuqadda ee hadda jiraa ay buuxinayaan baahiyaha shakhsiyaadka qaba LEP.
- Qiyaasta tirada la kulanka shakhsiyaadka qaba LEP.
- Qiimaynta in xubnaha shaqaaluhu fahmaan siyaasadaha iyo nidaamyada LEP ee DNR iyo sida loo fuliyo.
- Qiimaynta ilaha la heli karo.
- Jawaab-celinta ku saabsan waxtarka Qorshaha Helitaanka ama fahmitaanka Luuqadda DNR ee bulshooyinka leh LEP, oo ay ku jiraan isticmaalayaasha, ururada bulshada iyo u doodayaasha.

DNR ayaa cusboonaysiin doonta Qorshaha sida loogu baahdo, iyadoo lagu saleynayo qiimaynta sare.

## Habka Cabashada

DNR waxay leedahay hab lagu xalliyo cabashooyinka iyo arrimaha la xidhiidha xuquuqaha madaniga ah/takoorka. Cabashooyinka waxaa loo diri karaa Minnesota DNR, 500 Lafayette Road, St. Paul, MN 55155-4049 or AAOdiversity.DNR@state.mn.us.

# Lifaaqyada

## Lifaaqa I: Qeexida Shuruudaha

**Iskuduwaha Xuquuqda Madaniga ah -** Wakiilka DNR ee mas'uul ka ah fahamka iyo ilaalinta u hoggaansanaanta Ciwaanka VI ee Xeerka Xuquuqda Madaniga ee 1964, oo ay ku jiraan shuruudaha aqoonta Ingiriisiga xaddidan.

**Falanqaynta afar-arin** – Halbeeg dabacsan oo xaqiiqo ku tiirsan oo miisaamaya afartan arrimood ee soo socda: 1. tirada ama saamiga LEP-ga loo adeegay ama la kulmay dadka adeega u qalma; 2. inta jeer ee shakhsiyaadka qaba LEP ay la kulmaan barnaamijka; 3. nooca iyo muhiimada barnaamijka, hawsha ama adeega uu bixiyo qaataha; iyo 4. agabka uu heli karo qaatahu iyo kharashaadka.

**Turjumaadda hadalka** –Falka dhageysiga macluumaad ku baxaya hal luuqad (luuqadda laga soo turjumayo) iyada oo loogu afcelinayo luuqad kale (luuqadda loo turjumayo) lana ilaalinayo in macnaha macluumaadka asalka ah la gudbiyay.

**Turjumaanka** – Shakhsi ka soo gudbiya macnaha afka hal luuqad (luuqad isha) oo u gudbiya mid kale (luuqad bartilmaameed ah).

**Helitaanka ama fahmitaanka Luuqadda** – Dadaalka DNR si ay barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda u helaan shakhsiyaadka aan aqoonta u lahayn Ingiriisiga.

**Iskuduwaha Helitaanka ama fahmitaanka Luuqadda** – Wakiilka DNR ee mas'uulka ka ah isku-dubbaridka dhammaan dhinacyada Qorshaha Helitaanka ama fahmitaanka Luuqadda ee DNR si loo hubiyo in galaangal macno leh ay heli karaan shakhsiyaadka qaba LEP.

**Adeegyada Caawinta Luuqadda** – Adeegyada afka iyo qoraalka ayaa loo baahan yahay si loo caawiyo shakhsiyaadka qaba LEP inay si wax ku ool ah ula xiriiraan shaqaalaha oo ay hubiyaan helitaan macno leh, iyo fursad loo siman yahay oo si buuxda looga qayb qaato, barnaamijyada iyo hawlaha ay maamusho waaxdu.

**Qaybta Luuqadda** – Qayb qoraal ah oo wargelinaysa akhristayaasha, oo ku qoran luuqado kala duwan, sida ay u heli karaan caawimo lacag la'aan ah oo ay ku turjumaan macluumaadka dukumeenti gaar ah. Waxa laga yaabaa in lagu daro sida gelinta dukumentiyada ku habboon.

**Kaadhka Cadaynta Luuqadda** – Kaararka aqoonsiga luuqadda ayaa go'aamiya luuqadda uu qofku ku hadlayo. Waxay ku siinaysaa macluumaad ku qoran luuqado kala duwan oo qofku farta ku fiiqi karo oo uu aqoonsan karo luuqadda ay u baahan yihiin. Kaarka aqoonsiga luuqadda wuxuu ka koobnaan karaa luuqadaha inta badan lagula kulmo gudaha Minnesota.

**Kooxda Hirgelinta Helitaanka ama fahmitaanka Luuqadda** – Koox iskudhaf ah oo isku xidhan oo ka kala socda qayb kasta iyo gobol kasta si ay u caawiyaan aqoonsiga, kala hormarinta iyo wax ka qabashada baahiyaha Helitaanka ama fahmitaanka luuqadda ee bulshooyinka LEP ee uu  u adeego DNR.

**Khadka Luuqadda** – Khadka luuqadda wuxuu bixiyaa adeegyada tarjumaadda taleefanka shakhsiyaadka qaba su'aalo ku saabsan adeegyada iyo hawlaha DNR.

**Shaqsi aqoontiisa Ingiriisiga xaddidan tahay (LEP)**– Shakhsi kasta oo aan afkiisa koowaad ahayn Ingiriisi, awoodiisa hadal, qoraal, akhrin ama faham ee Luuqadda Ingiriisigu xaddidan tahay, si uu si fiican  ugu fahmo oo ugu dheg galo bulshada ku hadasha Luuqadda Ingiriisida . Shakhsiyaadka qaba LEP waxaa laga yaabaa in ay aqoon u leeyihiin Ingiriisiga noocyada qaarkood isgaarsiinta (tusaale ahaan, hadalka ama fahamka), laakiin weli LEP u ahaada noocyada kale ee isgaarsiinta (tusaale, akhrinta ama qorista).

**Helitaan macno leh** – Caawinta luuqadda ee keenta gudbin iyo xiriir sax ah, waqti ku habboon oo wax ku ool ah oo hubiya in shakhsiyaadka LEP qaba ay galaangal u yeeshaan barnaamijyada iyo hawlaha DNR.

**Xubin ka tirsan shaqaalaha luuqadaha badan** – Xubin ka tirsan shaqaalaha waaxda oo muujiyay aqoonta Ingiriisida iyo ugu yaraan hal luuqad oo kale lehna aqoon dhaqameed oo ku filan tarjumaad.

**Ogeysiinta**– Si firfircoon loogu wargeliyo shakhsiyaadka qaba LEP inay xaq u leeyihiin adeegyada, barnaamijyada iyo hawlaha DNR.

**Luuqadda aasaasiga ah** – Luuqadda uu qofku sida ugu habboon ugu hadlo.

**Barnaamijka ama Hawsha** – Tani waxaa ka mid ah barnaamijyada iyo adeegyada ay heli karaan ama la xiriira dadweynaha, oo ay ku jiraan gelitaanka dhulka dadweynaha, fulinta sharciga, barnaamijyada waxbarashada iyo ogolaanshaha iyo shatiyada.

**Turjubaanka Aqoonta leh** – Shakhsiga u bixiya adeegyada turjumaanka qaab heersare oo fahamkeedu sarreeyo, daacad ah, aan lahayn eexasho, ilaalinaya sirta iyo dabciga macluumaadka iyo xogta loo baahan yahay in loo turjumo luuqad kale.

**Waqti ku habboon** – Kaalmada luuqadda ee lagu bixiyo waqti iyo goob ka fogaanaysa diidmada wax ku oolka ah ee adeegga, faa'iidada ama xaqa la soo saaray, ama ku soo rogida culays aan loo baahnayn ama dib u dhac ku yimaada xuquuqaha, faa'iidooyinka ama adeegyada muhiimka ah ee shakhsiyaadka leh LEP.

**Turjumaada** – Beddelka qoraalka qoran ee hal luuqad (luuqad isha) oo lagu beddelayo farriin u dhiganta luuqad kale (luuqad bartilmaameed).

**Turjumaan** – Shakhsi ka gudbiya qoraal qoran  oo ka yimid hal luuqad (luuqad isha) oo u gudbiya fariin u dhiganta luuqad kale (luuqad bartilmaameed).

**Dukumentiyada ama macluumaadka muhiimka ah** – Waraaq ama ashyaa qoran oo elektaroonik ah oo ku kooban macluumaadka muhiimka u ah fahamka ama helitaanka barnaamijyada, hawlaha iyo adeegyada DNR, ama ka kooban macluumaadka hababka ama qababka sharcigu u baahan yahay, sida foomamka oggolaanshaha, codsiyada iyo ogeysiisyada xuquuqda. Kala soocida dukumeentiga mid "muhiim ah" waxay ku xiran tahay muhiimada barnaamijka, macluumaadka, la kulanka, ama adeega ku lug leh, iyo natiijada ka imanaysa shakhsiyaadka LEP qaba haddii macluumaadka laga hadlayo aan loo bixin si sax ah ama waqti ku habboon.

## Lifaaqa II: Ogeysiiska Xuquuqda Kaalmada Luuqadda

DNR waa in ay bixiso macluumaadka u ogolaanaya shakhsiyaadka qaba LEP in ay ogaadaan xaqa ay u leeyihiin adeegyada luuqadda ee bilaashka ah iyo wakhtiga ku habboon ee la xidhiidha macluumaadka, adeegyada iyo barnaamijyada DNR. Ogeysiinta waxaa lagu bixin karaa siyaabo kala duwan, oo ay ku jiraan kuwani laakiin aan ku xaddidnayn:

- Mareegta DNR iyo kanaalada kale ee isgaarsiinta dhijitaalka ah.
- Calaamadee meelaha ay khusayso, sida xarumaha soo-booqdaha jardiinooyinka ama goobaha xafiiska DNR.
- Kaararka aqoonsiga luuqadda ee ay wataan Saraakiisha Ilaalinta.
- Boodhadhka kaalmada luuqadda ee meelaha dadweynaha iyo meelaha shaqaaluhu la shaqeeyaan shakhsiyaadka leh LEP.
- Casuumada shirarka ama dhageysiga dadweynaha.
- Daabacaada baraha bulshada iyo warbaahinta loogu talagalay shakhsiyaadka leh LEP.
- Xiriirinta ururada bulshada, hay'adaha dawliga ah, iyo shaqsiyaadka xiisaynaya isticmaalaya agabka sida GovDelivery.

### Qaybta luuqadda DNR iyo khadadka gudbinta luuqadaha badan

Qaybta luuqaddu waa qayb qoraal ah oo ogeysiiya akhristayaasha sida ay u heli karaan caawimo bilaash ah oo ku saabsan tarjumidda macluumaadka dukumeenti gaar ah. Qaybta luuqadda waxaa laga yaabaa in lagu dhex daro dukumeentiga (habka la door bidaayo) ama waxaa lagu dari karaa gelis ahaan. Macluumaadka qaybta luuqadda waxaa hayn doona Isku-duwaha LA waxaana laga heli karaa intranetka DNR. Qayb kastaa waa inay dib u eegtaa dukumeentiyadeeda loogu talagalay dadweynaha ugu yaraan sannad kasta si loo go'aamiyo haddii qaybaha luuqadda ku habboon  loo baahan yahay hadda.